# Xuquuqda Eedeysanaha Dambi (Somali)

Marwooyin iyo Mudaneyaal,

Maanta sababta halkan ku keentay waa dambi lagugu soo oogay. Shaqadaydu waa in aan kuu sheego xuquuqdaada. Ka hor inta aanan kuu sharixin xuquuqdaada, bal aan wax kaaga sheego waxa aad filan kartid.

Haddii lagugu eedeeyo dambi fudud, wakhtiga dhageysiga maanta waxa laguugu sheegi doonaa eedeynta lagu saaray iyo ciqaabta ugu weyn ee wehelisa eedeynta. Waxa kale oo laguu sheegi doonaa ciqaabta ugu yar ee aan laga tagi karin ee la rabo in marka hore la oofiyo haddii aad qiratid inaad dambiga qabtid ama haddii lagugu xukumo dambiga. Ka dibna xaakinka ayaa ku weydiin doonaa haddii aad rabtid inaad sheegtid inaad qabtid dambiga ama aanad qabin dambiga, waxana aad maxkamadda u sheegi doontaa waxa aad dooratay. Waxa aan in yar ka dib wax kale kaaga sharici doonaa waxa doorashada aad sameysid macnaheedu noqon karo.

Dhageysigu si ka yara duwan sidii aan imminka sheegay ayuu u dhici doonaa haddii lagugu soo eedeeyo dambi culus. Haddii lagugu soo eedeeyay dambi culus, dhageysiga maantu waxa uu kow ka yahay dhawr dhageysi oo kale. Maanta xaakinku kuma weydiin doono inaad sheegtid inaad qabtid dambiga ama aanad qabin dambiga. Waxa kaliya ee lagu siin doonaa taariikhda dhageysiga ku xiga, kaasoo la yidhaahdo dhageysiga hore. Ujadeeda dhageysiga hore ma aha in la cadeeyo inaad qabtid dambiga lagugu soo eedeeyay ama aanad qabin. Taa beddelkeeda, waa in dambi-oogaha, oo matalaya Gobolka North Dakota uu maxkamadda u muujiyo inay u badan tahay in dambi dhacay iyo inaad adigu gashay dambiga. Haddii uu dambi-ooguhu soo bandhigo marag-kac ku filan in la yidhaahdo waxay u badan tahay inaad adigu gashay dambiga, ama haddii aad adigu si ikhtiyaar ah u oggalaatid in aan loo baahnayn in kiiskaaga loo qabto dhageysiga hore, ka dib waxa lagaa rabi doonaa in aad sheegtid inaad qabtid dambiga lagu soo eedeeyay ama aanad qabin.

Haddaba, haddii la soo koobo, dhageysiga maanta la qabanayo wuxu u shaqeyn doonaa sidatan. Waxa la sheegi doonaa magacaaga waana inaad hore u soo joogsatid. Waxa la akhriyi doonaa eedeynta lagugu soo rogay waxana laguu sheegi doonaa ciqaabta ugu weyn ee suurogalka ah ee

wehelisa eedeyntaa. Waxa kale oo laguu sheegi doonaa haddii ay jiraan wax ah ciqaab ugu yar oo aan laga tagi karin oo ku taala eedeyntaa. Haddii lagugu soo oogay dambi fudud, xaakinka ayaa ku weydiin doonaa inaad sheegtid inaad dambiga qabtid ama aanad qabin. Haddii lagugu soo oogay dambi culus, waxa lagu siin doonaa taariikhda dhageysigaaga ku xiga. Marka la gaadho dhamaadka dhageysiga waxa uu Xaakinku ka hadli doonaa haddii ay jiraan wax ah shuruud, sida lacag la dhigayo, oo lagama-maarmaan u ah in la sugo inaad iman doontid dhamaan ballamahaaga maxkamadda ee mustaqbalka.

Imminka aan wax kaaga sheego xuquuqdaada.

- Waxa aad xaq u leedahay inaad maqashid eedeynta lagugu soo oogay iyo ciqaabta wehelisa eedeyntaa.

- Waxa aad xaq u leedahay inaad joogtid maxkamadda marka uu dhacayo dhageysi muhiim ah oo ku saabsan kiiskaaga.

- Waxa aad xaq u leedahay dib-u-dhigis caqli-gal ah oo lagu sameeyo ballamaha kiiskaaga marka taasi ay lagama-maarmaan u tahay diyaarinta difaacaaga.

- Waxa aad xaq u leedahay in lagaa sii daayo xabsiga marka la oofiyo qodobo iyo shuruudo sugaya in aad ku soo noqon doontid maxkamadda wakhtiga la filayo.

- Waxa aad xaq u leedahay maxkamad-saaris dadweynaha u furan oo dhakhso ah.

- Waxa aad xaq u leedahay in qareen ama looyar kula taliyo ka hor inta aanad sheegin wax cadeymo ah, aanad ka jawaabin wax su'aalo ah ama wakhti kasta oo ay dhacayaan arrimo la xidhiidha kiiskaaga. Dambiyada qaarkood marka lagugu eedeeyo waxa uu sharcigu kuu oggol yahay inaad yeelatid qareen ama looyar xiitaa haddii aanad lacag haysan ku filan iska-bixinta kharashka looyarka. Marka lagugu soo eedeeyo dambiyadaa, haddii aanad awoodin inaad iska bixisid looyar adiga oo aan isa saarin dhib dhaqaale oo weyn, xaakinka ayaa mid kuu magacaabi doona iyada oo dawladdu kaa bixinayso kharashka. Waxa looyarka noocaa ah loo yaqaanaa difaace dadweyne. Hase yeeshee, waxa dhici karta in lagaa rabo inaad dib iskaga bixisid dhamaan ama qayb ka mid ah kharashka looyarka haddii lagugu xukumo dambiga.

- Waxa laga soo qaadayaa in aanad qabin eedeynta ilaa inta uu Gobolku ka cadeynayo inaad qabtid dambiga iyada oo intii caqli-gal ah aan shaki ku jirin.

- Waxa aad xaq u leedahay maxkamad-saaris ay fadhigo guddi dadweyne haddii aad sheegtid in aanad qabin dambiga. Haddii laguu sameeyo maxkamad-saaris ay fadhido guddi dadweyne, waa in dhamaan xubnaha guddida ee fadhiya maxkamaddu ay isku raacaan inaad qabtid dambiga ka hor inta aan lagugu xukumin kiiska. Waxa kale oo aad codsan kartaa in aan lagu saarin maxkamad ay fadhido guddi oo taa beddelkeeda uu

xaakin go’aan ka gaadho kiiskaaga, laakiin waa in dambi-oogaha iyo xaakinku isku raacaan in la oggalaado codsigaaga.

- Waxa aad xaq u leedahay inaad horjoogsatid oo aad su’aalo weydiisid markhaatiyada uu dambi-ooguhu keeno si ay marag lid kugu ah u furaan.
- Waxa aad xaq u leedahay inaad markhaatiyada ku qasabtid inay maragga kuu furaan iyada oo la isticmaalayo awoodda u-yeedhista markhaatiga ee Gobolka North Dakota.
- Waxa aad xaq u leedahay inaad iska aamustid oo aanad adigu markhaatiga isku furin. Haddii aad dooratid in aanad markhaatiga furin taa looma isticmaali doono si adiga lid kugu ah.

Kuwaasi waa xuquuqdaada aasaasiga ah. Imminka aan kuu sharaxo waxa dhici doono haddii aad sheegtid inaad qabtid dambiga.

Haddii aad, maanta ama taariikh dambe, sheegtid inaad qabtid dambiga waxa aad ka tanaasulaysaa dhamaan xuquuqda aan imminka soo sharaxay, oo uu ku jiro xaqa maxkamad-saaris ay guddi fadhido, xaqa inaad su’aalo weydiisid markhaatiyada, iyo xaqa inaad aamustid.

Waxa laga yaabaa in lagu siiyay talo uu soo jeediyay dambi-ooguhu oo ku saabsan xukunkaaga haddii aad sheegtid inaad qabtid dambiga. Waa inaad ogaatid in xaakinka aanay qasab ku ahayn inuu raaco talada dambi-oogaha. Xaakinku waxa uu xor u yahay inuu ku saaro xukun kasta oo uu rumeysan yahay inuu yahay cadaalad, kaasoo ay dhici karto inuu ka adag yahay waxa uu ku taliyay dambi-ooguhu. Haddii xaakinku aanuu raacin xukunka uu ku taliyay dambi-ooguhu, laguuma oggalaan doono inaad dib uga noqotid qirashadaada qabis dambi.

Waxa jira dhawr xaaladood oo gaar ah oo kuu leh cawaaqiib dheeraad ah haddii aad qiratid qabis dambi ama lagugu helo dambi. Fadlan si taxadir leh u dhageyso.

Haddii aanad ahayn muwaadin Maraykan oo aad qiratid qabis dambi ama lagugu helo dambi, waa lagu mastaafurin karaa. Waxa aad xaq u leedahay in lagu ogeysiiyo safaaradda wadanka aad ka soo jeedid asal ahaan, waana inaad la tashatid looyar fahamsan sharciga imigarayshanka ka hor inta aanad sheegin inaad qabtid dambiga, haddii arrintaasi ku khuseyo.

Haddii lagugu xukumo dambi culus ama dambiyada fudud qaarkood oo aad gashay adiga oo isticmaalayay ama haystay hubka rasaastu ka dhacdo ama hub kale oo khatar ah, ama haddii aad sugaysid maxkamad-saaris ku saabsan eedeyn dambi culus, ama haddii uu ku qabanayo amar badbaadin guri ama amar ah ha la xidhiidhin, ama haddii lagugu xukumay budhcadnimo guriga ah, waxa laga yaabaa in sharcigu kaa horjoogsado ama kuu diido lahaanshaha ama helista hubka rasaastu ka dhacdo ama rasaas.

Haddii lagugu xukumo dambi culus, ama dambi galmo, ama dambiyada qaarkood oo aad kula kacday ilmo, markaa waxa lagaa rabaa inaad bixisid qayb ah dhiiggaaga ama dheecaanada kale ee jidhkaaga. Qaybtaa waa la baadhi doonaa waxana warkaaga DNA-ga lagu dari doonaa xogaha kombiyuutarada ku jira ee ay leeyihin hay'adaha sharci fulintu. Haddii lagugu xukumo dambi galmo ama dambiyada qaarkood oo aad kula kacday ilmo, waxa kale oo qasab kugu ah inaad isu diiwaangalisid dambiile ahaan.

Haddii aad imminka ku jirtid tijaabin (probation) oo lagugu xukumo dambi, waxa suurogal ah in tijaabinta lagaala noqdo oo dambigii horena lagugu xukumo.

Haddii lagugu xukumo dambi waxyeelo gaadhsiiyay qof ama maal, waxa uu xaakinku kugu xukumi karaa inaad magdhow siisid qofka aad dhaawacday ama waxyeelada u geysatay.

Haddii aad qiratid qabista dambi ama lagugu helo dambi, waxa uu Sharciga Gobolku ka rabaa maxkamadda inay ku saarto kharashyada qaarkood. Marka dambiyada lagugu soo oogay iyo ciqaabta suurogalka ah laguu sharaxo, waxa kale oo laguu sheegi doonaa tirada kharashyada khuseeya nooca kiiskaaga.

Haddii aad codsatid in lagu siiyo difaace dadweyne, waxa jiri doono kharash ku saabsan ka- shaqeynta codsiga.

Kuwaasi waa waxyaabaha muhiimka ah ee la rabo inaad xusuusnaatid marka aanu maanta bilawno hawlahayaga. Waad ku mahadsan tahay dhageysiga.

Gudaha qolka maxkamadda, xaakinka ama karaaniga ayaa u yeedhi doona kiiskaaga. Marka kiiskaaga loo yeedho, fadlan hore u soo joogso si laguu arko.

Haddii aanad ahayn muwaadin Maraykan oo aad qiratid qabis dambi ama lagugu helo dambi, waa lagu mastaafurin karaa. Waxa aad xaq u leedahay in lagu ogeysiiyo safaaradda wadanka aad ka soo jeedid asal ahaan, waana inaad la tashatid looyar fahamsan sharciga imigarayshanka ka hor inta aanad sheegin inaad qabtid dambiga, haddii arrintaasi ku khuseyo.

Saxiixa aan saxiixayo Ogoysiiskani waxa uu cadeynayaa in aan akhriyey xaquuq ogaysiinta kor ku xusan ee la xiriirta qaadida dambiyada.

Taariikhda: (x)___________________
(x)_______________________________

Magacaaga Halkan ku Qor

(x)_______________________________
Magacaaga Halkan Ku SAXIIX